
# Badbaadada Hubka ee Somaliland: Xog Uruurinta ku saabsan Badqabnimada Bulshada oo ay Telefanka Gacanta ay ku qaadeen Mines Advisory Group


Isku soo wada duuboo, waxaa aad u sarreeya lahaanshaha qoryaha iyo dhacdooyinka rabshadaha la xidhiidha ee qoryaha oo shan gobol oo Somaliland ah, iyada oo diiwaannada sanadkii 2018 ee Isbitaalka Hargeysa laga soo sheegay in dhacdooyinka qorigu ay yihiin kuwa labaad ee ugu sareeya xaga dhimashada kiisaska isbitaalka la geeyay[1] laakiin aad bay u yar tahay cilmi-baadhisyo dhawaan laga sameeyay xaga arrimaha badbaadada bulshada.

Bishii Juun 2021, MAG Somaliland waxay samaysay xog-ururin lagu qaaday telefoon oo ku saabsan aqoonta shakhsiyaadka, dabeecadaha iyo hab -dhaqanka la xidhiidha badbaadada qoriga ee Somaliland. Xog-ururintaas waxaa laga ururiyey 530 jawaabood oo rag, haween, iyo dhallinyaro (rag iyo dumar ah) oo ku baahsan waddanka oo dhan. Natiijooyinka xog-ururinta waxaa loo adeegsan doonaa in lala waafajiyo barnaamijyada badqabnimada bulshada ee MAG ay wado fulinteeda, iyo in la sameeyo bilowga cilmi baadhis mustaqbalka ah oo ku saabsan saamaynta hubka yaryar iyo hubka fudud ee bulshada Somaliland.[2]

**Habka Cilmi baadhista**

MAG waxay samaysay oo ay diiwaangelisay liiska weydiimaha oo ka kooban 13 su'aalood oo Af Soomaali ku qoran oo leh kala doorashada goobo gelida kuwaas oo lagu samaynayay numberada taleefanka lagu isticmaalayo xog uruurinta . Viamo, oo ah shirkada samaysa cilmi baadhista xaga tilifonoonka ah iyo isgaadhsiinta , ayaa isticmaashay hab garaacis ah oo aan kala doorasho laheyn si ay u wacdo 10,927 lambar, kuwaas oo 2,775 ka mid ah laga jawaabay. Xog ururinta waxaa ku jiray farriin hordhac ah oo sharraxaysa ujeeddada xog-ururinta iyo in oggolaanshaha ka -qaybgalka laga noqon karo wakhti kasta iyadoo qofku uu xidhayo taleefanka, ka dib markaa dadka tilifoonka qabtay ama ka jawaabay waxaa laga rabaa inay riixaan '1' si ay oggoladaan ka qayb galka xog-ururinta. 2,775 ka- tilifoon ee laga jawaabay ama la qabtay, 571 qof ayaa oggolaaday inay ka qaybqaataan su'aalaha xog-ururinta, 551-na waxay si buuxa u dhamaystireen xog-ururinta.





[1] Mab Wikipedia. https://en.wikipedia.org/wiki/Regions_of_Somaliland#/media/File:Somaliland_regions.svg


**Lahaanshaha Hubka iyo Badqabnimada**

MAG waxay danaynaysay inay qiimayso heerka lahaanshaha qoryaha qoysaska Somaliland, laakiin way ka gaabstay inay si toos ah u weydiiso su'aashan xasaasiga ah maadama ay kala hadlaysay tilifan codka qofka la duubayey; taa beddelkeeda, su'aashu si dadban ayaa loo qaabeeyay, sida "Haddii uu qori yaalo gurigaaga, ma u malaynaysaa in si badbaado leh loo keydiyay?", iyada oo jawaabaha laga dooranayo jawaabaha la siiyay qofka xogta laga ururinayo oo kala ahaa "Haa, si badbaado leh ayaa loo keydiyaa" iyo "Maya, si badbaado leh looma keydiyo "oo loo isticmaalaya qiyaas ahaan lahaanshaha qoryaha ee qoysaska. Ka dib markii la adeegsaday habkan xaddidan, xog uruurintu waxay ku qiyaastay in 60% jawaab bixiyayaashu ay qori ku haystaan gurigooda. Jawaabahaani waxay 14 boqolkiiba ka hooseeyaan intii lagu soo sheegay xog-ururintii ugu dambaysay ee la xidhiidhay hubka ee laga sameeyay dalka, taas oo lagu ogaaday in lahaanshaha hubka ee dalka uu ahaa ilaa 74% - marka waxaan filaynaa in xog-ururinteenu ay dhayalsan karto heerka dhabta ah ee qori lahaanshaha qoysaska, sababaha suurtagalka ah waxaa ka mid ah: dadku waxay ka gaabsanayeen inay ka jawaabaan su'aashan iyagoo Khadka taleefanka ku jrra, dadku ma fahmin su'aasha - ama waxay noqon kartaa in lahaanshaha qoryuhu ay runtii hoos u dhacday tobankii sano ee la soo dhaafay.





Waxa xiise leh, 65% ragga ayaa ku jawaabay mid ka mid ah labadan jawaabood ee lahaanshaha qoriga, marka la bar bar dhigo 51% oo dumarka ah - iyada oo aan la helin macluumaad dadweyne oo adag way adag tahay in la ogaado in tani ay ka dhigan tahay in laga yaabo in raggu haystaan qoryo aysan xigtadooda dumarka ahi ayna ogeyn, ama qoysaska ay madaxda u yihiin haweenku uma badna lamana filayo inay yeeshaan qoryo. Rag ka badan (31%) marka loo eego dumarka (26%) waxay dareemeen in qoryaha gurigooda yaala aan si badbaado leh loo keydin.

Lahaanshaha hubka ayaa sidoo kale ku kala duwanaa gobol ahaan, heerka ugu hooseeyana wuxuu ahaa Awdal, halkaas oo 54% dadku ay sheegteen lahaanshaha qoriga, iyo kan ugu sarreeya oo ahaa Sool, 67%. Lahaanshaha hubka ayaa u muuqda mid wax yar ku badan miyiga (63%) marka loo eego jawaab bixiyayaasha magaalooyinka (59%), laakiin boqolkiiba tiro aad u sarraysa oo ah milkiilayaasha qoryaha miyiga (40%) ayaa dareemay in qorigooda si ammaan ah loo kaydiyey marka la barbar dhigo jawaab bixiyayaasha magaalada (27%).



In ka yar kala badh (45%) jawaab bixiyayaasha ayaa xaqiijiyay in ay qoyskooda kala hadleen badbaadada qoriga sannadkii la soo dhaafay, iyadoo jawaab bixiyayaasha soo hadhay ay sheegeen in aysan kala hadlin mawduuca ama aysan hubin inay kala hadleen iyo in kale. Dadka reer miyiga ah ayaa u badnaa (54% vs 40% reer magaalka) inay ka jawaabaan inay qoysaskooda kala hadleen badbaadada qoriga sannadkii la soo dhaafay.




Saddex-meelood laba meelood oo haween ah ayaa ku jawaabay midkoodna inaysan kala hadlin badbaadada kaydinta hubka/qoryaha ama aysan hubin inay ka wada hadleen badbaadada qoriga, halka 51% raggu ay sheegeen inay ka hadleen badbaadada kaydinta qoriga taasoo muujineysa farqi xaga jinsiga ah marka la eegayo ka hadalka badbaadada kaydinta qoriga.

Markii 218 -ka qof ee sida dhabta ah ugu jawaabay INAYSAN ka hadlin badbaadada qoriga la weydiiyay sababta aysan uga hadlin, waxaa la siiyay jaawaabo ay ka xulanayeen oo kala ahaa, ama 1) wax aqoon ah uma laha mawduuca si ay uga doodaan ama ugala hadlaan qoyska; 2) waxaa jira qof kale oo qoyska ka mid ahaa oo ku habboonaa ka hadalka mawduuca; 3) iyaga oo aan wax dan ah ka lahayn ka doodisteeda; 4) amaba sabab kale. Ragga iyo dumarka labadaba, aqoon la'aanta mowduuca ayaa ahayd sababta ugu badan ee aan looga hadlin (45% haweenka jawaabaha bixiyay iyo 35% ragga). "Aqoon la'aan" ayaa sidoo kale ahayd jawaabta ugu badan dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ee qoryaha leh - xitaa kuwa sheegay inaysan haysan qori, in badan oo ka mid ah ayaa sheegay inaysan ka hadlin badbaadada qoriga maxaa yeelay waxaa jirta aqoon la'aan xaga arinka badqabnimada qoriga ah (34%) marka loo eego inaysan u haynin xiisaha inay ka hadlaan (31%) oo laga yaabo inay tilmaamayso ka warhaynta mawduuca muhiimada uu u leeyahay nolosha qoyskooda, xitaa iyagoo aan qoriba lahayn.


Waxa xiise leh in, "aqoon la'aan" ayaa ahayd sababta ugu badan ee lagaga jawaabay inaan laga wada hadlin badbaadada qoriga ee dhammaan gobollada Somaliland marka laga reebo labo gobol, (Sanaag) oo ku jirta heerka labaad ee lahaanshaha qoysaska qoriga leh iyo (Awdal) oo ku jirta kan ugu hooseeya ee lahaanshaha qoysaska qori leh - labada meeloodba waxaa jawaab bixiyayaal badani ku jawaabeen "In aanay xiisaynayn ka hadlida badbaadada qoryaha iyo kaydintooda" (38% jawaab bixiyayaasha Sanaag iyo 44% jawaab bixiyayaasha Awdal).

### Aqoonta Badbaadada Qoriga

Jawaab bixiyaasha ayaa la weydiiyey dhinacyada badbaadada qoriga ee ugu muhiimsan inay bartaan. Jawaabaha la kala dooransiiyay waxay ahaayeen: 'Sida qoriga si badbaado leh loogu kaydiyo', 'Sida loogala hadlo qoyskaaga badbaadada qoriga', 'Sida carruurtaada looga ilaaliyo qoryaha', 'Sida qoriga loo diiwaangeliyo' ama 'midnaba intaas hore loo xusay'.

Jawaabaha su'aashu waxay ahayd mid ay ka siman yihiin da'a kasta, jinsiga (ragga iyo dumarka), iyo reer miyiga/magaalka, iyadoo jawaab bixiyayaashu ay isku raaceen in' sida qoriga si ammaan ah loo kaydiyo 'ay tahay tan ugu muhiimsan, oo ay ku xigto' sida qoyskaaga loogala hadlo badbaadada qoriga ', iyo 'sida aad carruurtaada uga ilaalinayso qoryaha'. Kaliya 7% ka qaybgalayaashii guud ayaa sheegay in 'sida qoriga loo diiwaangeliyo' ay

ugu muhiimsan tahay. Jawaab bixiyaashas oo sheegay in aysan qori ku haysan gurigooda ayaa ku qiimeeyay 'sida qoyskaaga loogala hadlo badbaadada qoriga ta ugu muhiimsan, halka kuwa soo sheegay in qorigooda si ammaan ah loo kaydiyey ay weli mudnaanta siinayaan barashada kaydinta qoriga ee nabdoon.





**Diiwaangelinta Hubka**

Dadka la waraystay ayaa la weydiiyey sida ay uga war hayaan nidaamka diiwaangelinta qoryaha ee Somaliland. Jawaabaha waxay ahaayeen kala dooransiin fudud oo ahayd ("haa", "maya", "ma hubo") sidaa darted laguma samayn qiimayn qoto dheer oo aqoonta jawaab bixiyayaasha. In ka badan 64% jawaab bixiyayaasha (70% ragga iyo 54% haweenka) ayaa sheegay inay ka warhayaan nidaamka diiwaangelinta. Ma jirin farqi weyn oo u dhexeeyay jawaab bixiyayaasha miyiga (63%) iyo reer magaalka (65%), waxaana jirtay in ka badan 50% oo ku baraarugsanaa ah oo gobolada oo dhan ah.

**Rabshada ka dhasha Qoriga**


Jawaab bixiyaasha badankood (66%) ma aysan maqlin wax ku saabsan dhacdooyin qori la xidhiidha oo ka dhacday qoyskooda ama bulshadooda, halka 21% ka mid ahi ay maqleen dhacdo ku saabsan qori, halka ay 13% aysan hubin inay maqleen iyo in kale. Si kastaba ha ahaatee, 28% jawaab bixiyayaasha da'doodu tahay 17 ama ka yar ayaa sheegay inay og yihiin ama maqleen dhacdooyin rabshado ah qorigu sababay - boqolkiiba inta ugu badan ee kooxihii la waraysaty ee da'aha kala duwan ahayd.




Ragga ayaa sidoo kale ka badnaa 9 boqolkiiba (24% vs 15%) marka loo eego dumarka inay maqleen dhacdooyinka rabshadaha qoryaha, 27% dadka deggan magaalada ayaa maqlay dhacdo marka la barbar dhigo 18% jawaab bixiyaasha miyiga ah, taas oo laga yaabo inay ka tarjumeyso badnida isku xidhnida bulshada ragga ah iyo deegaannada magaalooyinka.


113-ka qof ee sheegay inay maqleen dhacdo la xidhiidha rabshado qori ayaa la weydiiyay su’aal daba joogtay tii hore oo ku saabsan sababta dhacdada. Sababaha ugu badan ee rabshaduhu waxay ahaayeen isku dhacyo

hantiyeed (40%), waxaa xigay toogasho shil ah (26%),dhac/fal dambiyeed (19%), colaad qabiil/Isir (11%), iyo kuwo kale (5%). Iskudhacyada ka dhasha Murannada hantida ayaa ah kuwa ugu badan ee keena rabshadaha marka loo eego da'da , jinsiga (rag iyo dumar), iyo goobaha, laakiin heerka xogtu sheegtay wuxuu 10% ka sarreeyey miyiga marka loo eego magaalooyinka (45% vs 35%), halka' shilalka xogtu sheegtay inay boqolkiiba 9 ka sarrayso magaalooyinka marka loo eego miyiga (29% vs 20%).




Waxa xiiso leh in 15% raggu ay maqleen muran qabiil ama isir, marka la barbardhigo 0% dumar ah, halka dumarku ay boqolkiiba 13 ay u badanayeen inay maqleen rabshado ka dhashay shil qori – Waxaa lagu qiyaasay inay tani ka turjumayso noocyada kala duwan ee macluumaadka ragga iyo haweenku ay maqlaan/ogaadaan iyo warbixinaha kala duwan ee lagu wadaago ama lagu faafiyo goobaha caam ka ah.

Ugu danbayntii, waxaa jira farqi aad u wayn oo xog ururintu ka soo sheegtay dhacdooyinka la xidhiidha qoryaha ee gobolada kala duwan ee dalka. Jawaab bixiyayaasha Saaxil ayaa ku jawaabay cadadkii ugu sareeyay ee muran iyo isku qabsasho hantiyeed oo ahaa 60%, halka Togdheer (19%) iyo Saaxil (20%) ay sheegeen cadadkii ugu badnaa ee dhacdooyinka la xidhiidha qoryaha ee ay sababeen isku dhacyo qabiil ama isir.[6]




**Gebogabeyn iyo Cilmibaadhis Dheeri ah**

Cilmi-baadhistani waxay hordhac u tahay in la sameeyo xog-ururin isku dhafan oo qoto dheer si loo ogaado su'aalo uu mugdi ku jiro. Arrimaha mugdigu ku jiro waxaa ka mid ah tirada lahaanshaha qoryaha ee qoysaska ay raggu masuuliyada koowaad leeyihiin iyo kuwa dumarku masuuliyada koowaad leeyihiin, sababaha kala duwan ee reer miyiga, reer magaalka iyo da'aha kala duwan ee qoryaha leh ku kaliiftay inay qoryo lahaadaan, iyo siyaabaha kala duwan ee dadyowga kala duwani u helaan war bixinaha ku saabsan badbaadada qoryaha, diiwangalinta hubka iyo rabshadaha la xidhiidha qoryaha ee ka dhaca bulshada ay ku dhex nool yihiin.

Barnaamijyada badqabnimada bulshada ee MAG, natiijooyinkani, gaar ahaan kuwa la xidhiidha macluumaadka badbaadada qoriga, waxay tilmaamayaan in dad badani ay diyaar u yihiin inay qoysaskooda kala hadlaan badbaadada qoriga, laakiin aysan haynin macluumaadka si ay sidaas u sameeyaan – tani waxay rajo siinaysaa barnaamijyada MAG inay gali karaan barida khataraha qoryaha oo loogu talo galay qaybaha kala duwan ee bulshada ee wadanka.

MAG waxay soo saartay manhaj waxbarasho oo ku saabsan khataraha qoryaha kaas oo loogu talo galay qaybaha kala duwan ee bulshada; da'a ahaan kala duwan iyo rag iyo dumar ba, waxayna iminka tijaabinaysaa goobo-cilimiyeedyo oo lagu baranayo aqoonta khataraha loogu talo galay bulshooyinka deegaanada Togdheer, Saaxil iyo Maroodi Jeex. MAG waxay sidoo kale bilaabaysaa ololе dhamaystiran oo xaga raadiyaha ah, kaas oo lagu baahinayo wadan ka oo dhan, olaluhu wuxuu ka kooban yahay xayaysiisyo raadiyaha ah, barnaamijyada waraysiyada, riyaawado, sheeko wadaagyo ah si loo kobciyo baraarugsanaanta bulshada ee badbaadada qoryaha kaydindoota iyo diiwangalinta hubabka. Farriinta gaar ka ah ee ololaha raadiyoowga waxaa lagu saleeyay mudnaanaha ka soo baxay xog-ururinta.

Mustaqbalka, MAG waxay qorsheyneysaa inay la shaqeyso maamulada gobolada dalka si loo kordhiyo awoodda maxalliga ah ee diiwaangelinta hubka guurguura ee miyiga iyo meelaha ay adag tahay in la gaadho, iyo in la sahamiyo suurtagalnimada ballaadhinta tababarka Is-beddelada Khilaafaadka (oo hadda la siiyo saraakiisha booliiska) iyo hoggaamiyeyaasha kale ee bulshada, si kor loogu qaado awoodda xallinta khilaafaadka loona yareeyo rabshadaha ka dhex dhaca bulshooyinka.